

# Goobta Nadiifinta Duwamish Waterway Park



Duleedka Biyaha Duwamish Waterway Park (Waxaa Iska leh Magaalada Seattle))

## Faalooyinka waa la aqbalay:

Janaayo 30 - Maaro 15, 2023

## Gudbi faalooyinka:

Onlayn: [www.bit.ly/Ecology-DuwamishWaterwayPark-Comments](http://www.bit.ly/Ecology-DuwamishWaterwayPark-Comments)

### Boos ahaan:

David Butler, Site Manager  
 PO Box 330316  
 Shoreline, WA 98133-9716  
 Taleefanka: (206) 518-3513  
 limeelka: [David.Butler@ecy.wa.gov](mailto:David.Butler@ecy.wa.gov)

## Waraaqaha la akhriyay:

[www.bit.ly/Ecology-DuwamishWaterwayPark](http://www.bit.ly/Ecology-DuwamishWaterwayPark)

Seattle Public Library  
 South Park Branch  
 8604 8th Ave S.  
 Seattle, WA 98108  
 Taleefanka: (206) 615-1688

## Macluumaadka goobta:

Aqoonsiga Goobta Xarunta: 49919  
 Aqoonsi Nadiifinta Goobta: 15139

## Macluumaadka Xidhildhka Warceyigelinta Shacabka:

Ian Fawley, Qorsheeyaha Wacyi  
 Gelinta  
[LDW@ecy.wa.gov](mailto:LDW@ecy.wa.gov)  
 Taleefanka: (425) 324-5901

## Waraaqaha diyaarka ah ee ay shacabku ka faaloon karaan

Waaxdu bay'adu waxay heshiis sharci ah oo loo yaqan Amarka Lagu Heshiiyay la gashay Magaalada Seattle (Magaalada), Qofka Ka Masuul Noqonaya (Potentially Liable Person, PLP), iyo nadiifinta goobta Duwamish Waterway Park (Goobta) ee 7900 10th Avenue South, in Seattle. Amarka Lagu Heshiiyay waxa uu uga baahan yahay Magaalada inay ka jawaabto wasakhda Goobta. Wuxuu aanu doonaynaa fikirkaaga in aanu ka helno waraaqaha soo socda:

- **Amarka Lagu Heshiiyay:** waraaqaha sharciga ah waxay ku waajibinayaan Magaalada inay baadho mushkiladaha deegaanka, buuxiso Xalka Baadhitaanka (Remedial Investigation, RI), Qorshaha Daraasada (Feasibility Study, FS), iyo qabyo qoraalka Qorshe Hawleedka Nadiifinta (Cleanup Action Plan, dCAP).
- **Qorshaha Kaqayb Galaha Shacabka:** sharaxa sida waaxda Bay'ada ay ku wargelinayso bulshada wixii ku saabsan hawlaha goobta iyo qaababka looga qayb geli karo.

## Kulamo Onleyn iyo Foolka-fool ah

Waaxda Bay'adu waxay qaban doontaa kulan onleyn iyo foolka-fool ah oo Goobtan ah oo turjubaan\* ayaa la heleyaa.

### Onleyn: Talaatada, Febraayo 7, 2023

- **Isku Duwaan Geli oo Ku Biir Zoom-ka:** [www.bit.ly/Ecology-DuwamishWaterwayPark](http://www.bit.ly/Ecology-DuwamishWaterwayPark)
- **Khudbadaha:** Duhurnimada
- **Su'aalaha iyo jawaabaha:** 1 duhurnimo, sida loogu baahdo
- **\*Turjubaan ayaa lagu helayaa barnaamijka Zoom:** Jayniis, Isbaanish, Fiirnaamiis, Khmer, Soomaali, iyo Amharic

### Foolka-fool: Arbacada, Febraayo 8, 2023

- **Goobta:** South Seattle College, 6000 16<sup>th</sup> Ave SW, Seattle, WA
- **Khudbadaha:** 6:30 galabnimo.
- **Su'aalaha iyo jawaabaha:** 7:30 habeenimo, sida loogu baahdo
- **\*Turjubaada waxaa lagu heleyaa taleefanka qacanta iyo samecadaha:** Jayniis, Isbaanish, Fiirnaamiis, Khmer, Soomaali, iyo Amharic

**Wixii macluumaad dheeraad ah, ka eeg boga 5 →**

## Taarikhda Goobta

Duwamish Waterway Park oo ku yaala 7900 10th Avenue South in Seattle WA. Qiyaasta 1.5 eekar Goobta waxaa weeye habaynta Goobta Lower Duwamish Waterway (LDW) Superfund. Waxaa kamid ah aaga lagu ciyaaro, aaga dalxiiska, meelaha la lugeeyo, iyo bada xeeligeeda ee biyaha laga galoo. Waaxda Beeraha Nasashada iyo Madadaalada Magaalada Seattle (City of Seattle Department of Parks and Recreation, SPR) waxay maamulaysay beertan nasashada ilaa 1975. Magaaladu waxay kaga iibsatay jimplad alaabta beerta nasashada Degmada King 2019. Alaabta iminka waxaa iska leh Magaalada Seattle iyo Dekada Seattle. Dadka hore u deganaa iyo alaabaddka beeraha waxay lahaayeen mid, oo waxay meesha ka saareen 1980yadii.


2014 iyo 2019, baadhitaan ciida ee hore ayaa lagu arkay liidh iyo ciid waxyabaha holcaa ay la socdaan. Daynrtii 2019, Waaxda

Bay'ada ayaa la ogaysiiyay, oo Baadhitaanka Hore ayaa dhamaaday Janaayo 2020. Baadhitaanka Hore waxaa lagu ogaaday in wasakhdu ay khatar ku tahay caafimaadka bilaa aadanka iyo bay'ada, oo talaabooyin nadiifin dheeraad ah loo baahan yahay. Febraayo 2020, Goobta waxaa lagu qoray Liiska Goobaha [Waaxda Bay'ada Xaqiijiyay iyo Ka Uga SHakiday Wasakhda](#)<sup>1</sup>, sida uu dhigayo sharciga nadiifinta gobolku, Sharciga Xakamaynta Sunta Qaabka ([MTCA](#)<sup>2</sup>).

## Wasakhda

Talaabooyinka hakaajinta ayaa la sameeyay intii u dhaxaysay 2014 - 2022 oo waxaa lagu xaqiijiyay in wasahada soo socda ay ka jiraan ciida Goobta:

- Arseenig, liidh, meerkuri iyo biro kale
- Polychlorinated biphenyls (PCBs)
- Carcinogenic Polycyclic Aromatic Hydrocarbons (cPAHs)
- Dioxins iyo furans
- Shidaal iyo phthalates
- Waxyaboo kale oo dabiici ah



Muuqaalka guud ee goobta nadiifinta Duwamish Waterway Park

<sup>1</sup> <https://apps.ecology.wa.gov/cleanupsearch/reports/cleanup/contaminated>

<sup>2</sup> <https://www.ecology.wa.gov/mtca>

## Barnaamijka Nadiifinta Sunta

### Mudada nadiifinta Duwamish Waterway Park

Barnaamijka Nadiifinta Ikhtiyaarka ah  
(Voluntary Cleanup Program<sup>3</sup>, VCP) waxay u  
suurto gelisay mulkiilayaasha goobaha  
wasakhaysan inay buuxiyaan heerarka  
nadiifinta gobolka sida uu dhigayo MTCA  
madaxa banaan iyo inay helaan tilmaamo  
farsamo oo ay ka helaan Waaxda Bay'ada  
inta ay socoto shaqadu. VCP waxay u  
suurto gelinaysaa mulkiilayaasha inay ku  
shaqeeyaan qandaraas halki ay ku shaqayn  
lahaayeen amarka sharciga ah ee Waaxda  
Bay'ada. Ka qayb galayaasha VCP waxay  
siiyan khidmad Waaxda Bay'ada si waaxdu  
ugu bixiso kahrashka tilmaamaha iyo  
qiimaynta. Goobaha VCP waa inay  
buuxiyaan heerar nadiifin oo lamid ah sida  
hantiyaha ay hore u maamuli jirtay Waaxda  
Bay'ada ee hoos yimaada MTCA.



Aaga lagu ciyaaro ee Duwamish Waterway Park, Sebteember 2022

Julaay 2020 Beeraha Nasashada iyo

Madadaalada Seattle (SPR) waxay gashay

VCP oo waxay dalbadeen qiimaynta iyo fikirka Baadhitaanka Bixinta (RI) ee Duwamish Waterway Park Julaay 2020. Waaxda Bay'adu waxay ka dalbatay macluumaad dheeraad ah SPR Agoosto 2020 oo qabyo qoraalka ah warqada fikirkooda. SPR waxay bilawday shaqada dib u hagaajinta Oktoobar 2020. Waaxda Bay'ada waxay naqdiday RI dib u eegista lagu sameeyay Agoosto 2021 taas oo ay ku jirto macluumaad dheeraad ah ee talaabooyinka kumeel gaadhka ah. Talaabooyinka kumeel gaadhka ah ee goobta waxaa kamid ah qodista ciido gaar ah, saarida iyo ku bedelka buuxinta nadiifinta; dhismaha jidka sagbada ah, bedelka dhirka iyo dhigitaanka waxa loo dhigo, iyo ku rakibida teknoolojiyado kale duwan oo la qabsado beerta nasashada oo dhan.

Oktoobar 2021, Waaxda Bay'adu waxay soo saartay warqada fikirka ee SPR ee talaabooyinka nadiifinta kumeel gaadhka ah ee madaxa banaan ee goobta. Warqada fikirka waxaa lagu sheegey dhawr walaac oo ku saabsan saamaynta ka iman kara ee caafimaadka bilaa Aadanka iyo bay'ada. Waaxda Bay'ada fikirkeeda waxa uu sidoo kale sharaxaa dhawr gal dalool oo macluumaad oo ku saabsan qaybaha RI iyo Daraasada Macquuliyada (Feasibility Study, FS) - qaabka goobta iyo samaynta heerarka nadiifinta ee xulashada iyo dhaqan gelinta ficalka nadiifinta ee MTCA. Waaxda Bay'ada fikirkeedu waxa uu bixiyaa tilmaamaha iyo dhabada loo marayo SPR si looga jawaabo wasakhda goobta ee MTCA, iyada oo yoolka laga leeyahay ay tahay in Wax Talaabo Dheeraad ah la qaadin.

Kadib warqada fikirka Waaxda Bay'ada, SPR waxay qaadi doontaa muunad biyaha duleedkeeda ah oo madax banaan oo waxay ogolaaday inay ka jawaabto gal daloolada macluumaadka Waaxda Bay'ada ee warqada Fikirka iyada oo la samaynayo qabyo qoraal iyo lagu doonayo fikirka Bay'ada ee qorshe hawleedka RI/FS. Abriil 2022 Bay'adu waxay heshey SPR qabyo qoraal ah qorshe hawleedka RI/FS.

Iyada oo laga duulayo natijada qabyo qoraalka qorshe hawleedka RI/FS iyo murugsanaanta korniinta ee nadiifinta Goobta, Waaxda Bay'adu waxay go'aamiyeen in meesha laga saaro mashruuca CVP iyo inay loo wareejiyo Goobta nidaamka rasmiga ah ee hoos yimaada Amarka Lagu Heshiiyay. Nidaamkan, Waaxda Bay'ada waxay yeelan doontaa kormeer dheeraad ah oo ku saabsan nadiifinta nidaamka nadiifinta VCP ee madaxa banaan, oo waxaa kamid ah joogtay iyo in si firfircoo loola shaqeeyo bulshada iyo wacyi gelinta.

<sup>3</sup> <https://ecology.wa.gov/Spills-Cleanup/Contamination-cleanups/Voluntary-Cleanup-Program>

## Barnaamijka Nadiifinta Sunta

### Sababta goobtan ay muhiim u tahay

Goobta Duwamish Waterway Park waxaa weeye habayn Goobta [Lower Duwamish Waterway](#)<sup>4</sup> Superfund, oo waxaa kamid ah 5 mayl oo la lugeeyo Wabiga Duwamish. Hay'ada Ilaalinta Deegaanka (Environmental Protection Agency, EPA) ee Maraykanka waxay ku dareen [Goobta LDW Superfund](#)<sup>5</sup> ee Liiska Mudnaanta Qaran ee Superfund 2001. Waaxda Bay'ada waxay ka shaqaynaysaa sidii ay u joojin lahayn ama u yarayn lahayd ilaha wasakhda ee Goobta LDW Superfund, dadaalka oo loo yaqaan "[xakamaynta isha](#)<sup>6</sup>," si markaa EPA ay uga shaqayso nadiifinta webiga dushiisa.



### Maxaa dhici doona ee xiga?


Waaxda Bay'ada waxay eegi doonaan dhamaan faloooyinka la heley mudada faalooyinka shacabka oo waxay qaadan kartaa isbedel Amarka Lagu Heshiiyay ama Qorshaha Kaqayb Galka Shacabka. Hadii waraaquhu ay u baahan yihiin isbedel joogto ah, wuxuu qaban doonaa mudo faalo oo shacab oo kale.

Hadii isbedel wayn aan la samayn, Waaxda Bay'ada waxay soo gabayn doontaa waraaqaha oo Magaaladu waxay samayn doontaa Baadhitaanka Xalinta, Daraasada Macquuliyada, iyo abuurista Qorshe Hawleedka Nadiifinta Qorshe Qabyo Qoraalka ee qiimaynta shacabka.

Mid kasta oo akmid ah talaabooyinkan waxay u baahan doonaan mudo faalo shacab. Muuqaalka hoose waxa uu muujinaya heerarka kala duwan ee nadiifinta. Heerar badan ayaa mararka qaar wada dhaca mudo kaliya oo faalada shacabka ah.

### Nidaamka nadiifinta Waaxda Bay'ada

Sharciga Maamulida Qaabka Sunta ([MTCA](#))<sup>7</sup> waxaa weeye sharciga nadiifinta bay'ada Washington. Waxa uu bixiyaa shuruudaha nadiifinta goobta wasakhaysan iyo heerarka samaynta ee ilaalia caafimaadka bilaa aadanka iyo deegaanka. Dhaqan gelinta Waaxda Bay'ada ee [nidaamka nadiifinta MTCA](#)<sup>8</sup> iyo kormeerka nadiifinta.



Nidaamka nadiifinta rasmiga ah ee Washington ([la soo dag qoraalka sharaxa ah](#)<sup>10</sup>)

<sup>4</sup> <https://ecology.wa.gov/Spills-Cleanup/Contamination-cleanup/Cleanup-sites/Lower-Duwamish-Waterway>

<sup>5</sup> <https://cumulis.epa.gov/supercpad/cursites/csinfo.cfm?id=1002020>

<sup>6</sup> <https://ecology.wa.gov/Spills-Cleanup/Contamination-cleanup/Cleanup-sites/Lower-Duwamish-Waterway/Source-control>

<sup>7</sup> <https://ecology.wa.gov/mtca>

<sup>8</sup> <https://ecology.wa.gov/Spills-Cleanup/Contamination-cleanup/Cleanup-process>

<sup>10</sup> <https://apps.ecology.wa.gov/publications/SummaryPages/1909166.html>

## Barnaamijka Nadiifinta Sunta

### Meesha Lagu Ciyaaro Beerta Nasashada

Qorshaynta shacabka ee barnaamijka Bulshooyinka Caafimaadka Iskaashiga Bulshada Wabiga Duwamish (2013) iyo Qorshaha Himilada Makaanka Cagaarka Beerta Nasashada Koonfur ee Hay'ada Beerta Nasashada Seattle (2014) ee lagu sheegey Duwamish Waterway Park oo ah meel furan oo muhiim ah oo bulshada oo u baahan hormarinta loo baahan yahay. Waxaa weeye meesha kaliya ee cagaaran ee ay dadka degan ay heli karaan iyo in la siiyo meelaha la helo ee biyaha ee madadaalo ee muhiimka u ah hawlahaa bulshada.

Asxaabta Duwamish Waterway Park waxa uu hogaaaminayaada dadaalka sanado badan oo lagu turjubayo himilada bulshada ee beeraha nasashada xaafada ee rasmiga ah ee nashqada ugu danbaysa. La shaqaynta SPR iyo Seattle Parks Foundation, Friends of Duwamish Waterway Park waxa ay uruuriyeen malaayiin doolar oo hormarinta beerta nasashada. Dhismaha waxaa la dhameeyay dhamaadka 2022. Hagaajinta goobtu waxay bilaabantay 2020 oo ilaa maanta way soo socotaa.



Sawirka farsamo ee muujinaya hormarka wakhtiga iyo la sugayo ee

### Macluumaadka Luuqada

**Español:** Para ver una copia de esta hoja informativa en español (que incluye información sobre reuniones públicas el 7 y 8 de febrero con interpretación), visita [www.bit.ly/Ecology-DuwamishWaterwayPark](http://www.bit.ly/Ecology-DuwamishWaterwayPark), the Seattle Public Library South Park Branch, llama al (360) 407-6097, o manda un correo electrónico a [preguntas@ecy.wa.gov](mailto:preguntas@ecy.wa.gov).

**中文:** 要查看 中文 情况说明书（包括有关 2 月 7 日和 8 日公开会议的信息，及口译），请访问西雅图公共图书馆南公园分馆 [www.bit.ly/Ecology-DuwamishWaterwayPark](http://www.bit.ly/Ecology-DuwamishWaterwayPark), the Seattle Public Library South Park Branch 致電 425-324-5901，或電子郵件 [sunny.becker@ecy.wa.gov](mailto:sunny.becker@ecy.wa.gov).

**Tiếng Việt:** Để xem bản sao của Tờ Thông Tin này bằng tiếng Việt (bao gồm thông tin về các cuộc họp công cộng vào ngày 7 và 8 tháng 2 có thông dịch), hãy truy cập trang mạng: [www.bit.ly/Ecology-DuwamishWaterwayPark](http://www.bit.ly/Ecology-DuwamishWaterwayPark), the Seattle Public Library South Park Branch, hoặc gọi (360) 407-6097, hoặc gửi email đến [Lngu461@ecy.wa.gov](mailto:Lngu461@ecy.wa.gov).

**ភាសាខ្មែរ:** ដើម្បីមិនអាចសារចំណាំភាសាខ្មែរ (រួមមានព័ត៌មានអំពីកិច្ចប្រជុំសាធារណៈនេះឡើងទៀត និង 8 ខែក្នុង: ដោយមានការបកក្រោមភាសា) សូមចូលមេណីនៅក្នុង [www.bit.ly/Ecology-DuwamishWaterwayPark](http://www.bit.ly/Ecology-DuwamishWaterwayPark), សាខា Seattle Public Library South Park Branch, សូមហៅទូរសព្ទលេខ (425) 324-5901, បូអីនៃមែល [LDW@ecy.wa.gov](mailto:LDW@ecy.wa.gov)

**Af Soomaali:** Si aad u eegto nuqulka xaashidan macluumaadka oo oo ku qoran af Soomaali (waxaa kamid ah macluumaadka kulmada shacabka Febraayo 7 iyo 8 oo turjuban), booqovisit [www.bit.ly/Ecology-DuwamishWaterwayPark](http://www.bit.ly/Ecology-DuwamishWaterwayPark), the Seattle Public Library South Park Branch, la hadal (425) 324-5901, ama iimeel u dir [LDW@ecy.wa.gov](mailto:LDW@ecy.wa.gov)

**አማርኛ:** የዚሁን የእውነት ወረቀት ቅሬታ በአማርኛ ለማየት (በፋይናዋሪ 7 እና 8 ላይ ከተደጋሚ ጋር ስለሚደረገ ሆኖም ስብሰባ መረጃን ተፈጻሚ): [www.bit.ly/Ecology-DuwamishWaterwayPark](http://www.bit.ly/Ecology-DuwamishWaterwayPark): የSeattle Public Library South Park Branch ይቻል:: በ (425) 324-5901 ላይ ይደውሉ:: ወደም [LDW@ecy.wa.gov](mailto:LDW@ecy.wa.gov) ላይ አጥቃላይ ይለከ::

Barnaamjika Nadiifinta Sunta  
PO Box 330316  
Shoreline, WA 98133-9716

## Goobta Nadiifinta Duwamish Waterway Park

Waraaqaha diyaarka ah ee ay shacabku ka faaloon karaan



Información en Español incluida (página 5)

有關的信息, 已被翻譯成中文 (第5頁)

Có thông tin bằng tiếng Việt (Trang 5)

তেক্ষণমান জলপথ স্টেশন ম্যানেজমেন্ট প্রকল্প (৫ তার ৫)

Macluumaad af Soomaali ah ayaa la socda (Boga 5)

ေလမ္မင်္ဂလာ ၁၀ ၂၀၃၄၊ ၂၀၃၅ ၈ ၂၀၃၆ (၇၁ ၅)

### Mudada Faalada Shacabka

Janaayo 30 - Maaro 15, 2023

[www.bit.ly/Ecology-DuwamishWaterwayPark-Comments](http://www.bit.ly/Ecology-DuwamishWaterwayPark-Comments)

### Public Meetings – See Page 1 for information

**Onleyn:** Talaato, Febraayo 7, 2023 laga bilaabo Duhurnimada

**Foolka-fool:** Arabacada, Febraayo 8, 2023 laga bilaabo 6:30 galabn...

[www.bit.ly/Ecology-DuwamishWaterwayPark](http://www.bit.ly/Ecology-DuwamishWaterwayPark)

### Gelida ADA

Si aad u dalbato qaabilaada ADA< waxa aad kala xidhiidhaa Waaxda Bay'ada taleefanka 425-324-5901 ama  
[iimeelkaLDW@ecy.wa.gov](mailto:iimeelkaLDW@ecy.wa.gov), ama booqo [ecology.wa.gov/Accessibility](http://ecology.wa.gov/Accessibility). Wixii Adeega Gudbinta ah ama TTY la hadal 711  
 ama 877-833-6341.



Khariirada muuqaalka nadiifinta goobta ee  
Duwamish Waterway Park, 2021